


## Kaadhka Qofka Ka Hadlaya Madasha Wada Xaajoodka Shacabka



Qof kasta oo muwaadin ah oo reer Fridley ah, shaqaalaha Dugsiyada Shacabka Fridley, ardayda Dugsiyada Shacabka Fridley, ama waalidka/koriyaha ardayga Dugsiyada Shacabka Fridley waxay si kooban uga hadlayaa madasha wax loogu sheegayo Gudida Maamulka Dugsiga. Gudidu waxay dhagansan doontaa macluumaadka kooban, waxay waydiin doonaa su'aalo faahfaahin ah, oo hadii ay doonto, waxay ka dalban kartaa in maamulku uu dabo galo. Gudidu kulankan dhaxdiisa wax talaabo ah qaadi maayaan

ee wixii dalab ah ee markaa loosoo gudbiyo.

Shaqaalaha, ardayda iyo xubnaha Gudida Maamulka Dugsiga ayaa ka wada hadli doono Shuruucda Sirta Macluumaadka oo wixii cabashooyin ah iyo/ama tabasho ah ee ku saabsan midkoob ee si qaawan loogaga hadlo inta uu socdo kulanka shacabku. Wixii tabasho shakhsi ahaaneed waa in lagu socodsiiyaa shakhsiyadka sida ay u kala horeeyaan ee soo socota: maamulaha dhismaha, Madaxa Shaqaalaha, Maamulaha Guud, iyo iyada oo qoraal ah Gudida Maamulka Dugsiga.

Wixii duwaanka saxda ah ee qoraalka kulankeena, waxaad buuxisaa macluumaadka xidhiidhka ee ciwaanka oo waxaad siisaa Gudida Maamulka Gudoomiyahooda. Aad ayaad u mahadsan tahay.

MAGACA \_\_\_\_\_

CARUURTA KU JIRTA DUSIGEE? AMA HAYDA AAD LA JOOGTO? \_\_\_\_\_

MAWDUUCA/AJANDAHA UGU SAREEYA \_\_\_\_\_



Kusoo dhawaw Kulanka Gudida Maamulka Dugsiga ee Dugsiyada Shacabka Fridley Si loo furo xidhiidhka, Degmada Dugsiga Fridley waxay doonaysaa inay kusiiso fursad wax loogu sheegayo Gudida Maamulka Dugsiga. Fursadaas waxaa lagu bixin doonaa kulanka Dugsiga Kasta inta lagu jiro Wada Hadalka Shacabka.

1. Qof kasta oo muujiyay rabitaanka wixii ku saabsan ajandaha Gudida a lagu jiro Wada Hadalka Shacabka waxaa sheegi doona Gudoomiyaha Gudida. Marka laguugu yeedho mashraxa, fadlan sheeg magacaaga iyo mawduuca. Waa in qodobada iyada oo isku duuban loogu socodsiiyaa Gudida, oo aan lagu socodsiiyin xubno gaar ah ama aan kamid ahayn Gudida.
2. Hadii ay jiraan dad meesha jooga oo ka hadlaya isku mawduuc, fadlan waxaad soo wakiilataan cida soo koobaysa arrinka.
3. Fadlan kusoo koob hadalkaaga sadex daqiiqo. Wakhti dheer ayaa la isasiin karaan taas oo uu bixin karo Gudoomiyaha Gudidu. Hadii ay kuu qoran tahay faaladaadu, waxaa aad siisaa Gudida nuqul, kaas oo ka caawinaya inay si wanaagsan u fahmaan, baadhaan, oo ay ka jawaabaan wixii tabasho ah.
4. In qof, barnaamij, ama koox uu waarero qof la hadlaya Gudidu lama aqbali karo oo waxaa loo diidayaa qofkaasi inuu la hadlo Gudida. Maadaama oo uu jiro sharciga sirta macluumaadku in magac qof lasoo qaadaa way ka baxsan tahay nidaamka. Dadka hadlaya ee diida inay u hogaansamaan shuruucda ama mudada wakhtiga waa laga joojin doonaa inay hadlaan.